

## رسالة تحذير من فرق الضلال الثلاث الوهابية وجماعة حزب الإخوان

### أتباع سيد قطب وجماعة حزب التحرير أتباع تقي الدين النبهاني

**KITAAB KA DIGAYA KOOXAHA LUNSAN EE SADDEXDA AH:  
WAHHAABIYADA, IYO KOOXDA XISBIGA IKHWAANKA EE SAYYID  
QUTUB RAACSAN IYO KOOXDA XISBIGA TAXRIIRKA EE RAACSAN  
TAQIYUDDIN AN-NABAHAANI**

الحمد لله وصلى الله على سيدنا محمد النبي الأمي وعلى عائله وصحبه وسلم. أما الوهابية فهم أتباع محمد بن عبد الوهاب المتوفى سنة ألف ومائتين وست هـ. وأما حزب الإخوان فهم أتباع سيد قطب المصري. وأما حزب التحرير فهم أتباع تقي الدين النبهاني الفلسطيني.

#### Hordhac:

Mahadi Eebbe ayay u sugnaatay, Eebba ha u naxariisto Sayyidkeennii Muxamad ahaa ee Nabiga Ummigaa ahaa iyo ahalkiisii iyo asaxaabtiisii nabadna korkooda ha yeelo.

Kolka Wahhaabiyadu waa koox raacsan Maxamad Bin Cabdulwahhaab oo dhintay sanadkii 1206H. Xisbiga Akhwaankuna waxay raacsanyihiin Sayyid Qutub oo Masri ah. Xisbiga Taxriirkuna waxay raacsanyihiin Taqiyuddin an-Nabaana oo Falastiini ah.

فاما محمد بن عبد الوهاب فهو رجل لم يشهد له أحدٌ من علماء عصره بالعلم بل إن أحاه سليمان بن عبد الوهاب رد عليه ردين لمحالفته ما كان عليه المسلمون من أهل بلده وغيرهم من الحنابلة وغيرهم، أحد الردين يُسمى "الصواعق المحرقة" والردد الآخر يُسمى "فصل الخطاب في الرد على محمد بن عبد الوهاب".

#### Maxamad Bin Cabdulwahhaab iyo Wahhaabiyada

Kolka Maxamad Bin Cabdulwahhaab wuxuu ahaa nin aanan cid ka mid ah culumadii waagiisa aanay uga markhaatikicin in uu caalim yahay, taa daaye, walaalkiis Sulaymaan Bin Cabdulwahhaab ayaa reddiyay laba jeer maxaa yeelay wuxuu khilaafay wixii Muslimiintu aaminsanaayeen ee ay ka mid ahaayeen kuwii ay isku degaanka ahaayeen iyo qaar kaleba ee Xanaabilada ahaa iyo kuwa kaleba, labada redi mid ka mid ah waxaa lagu magacaabaa "as-Sawaaciq al-Muxriqah), raddiga kalena waxaa lagu magacaabaa (Faslul khitaab firraddi calaa Maxamad Bin Cabdilwahhaab".

وكذلك العالم الشهير مفتى مكة للحنابلة محمد بن حميد لم يذكر محمد بن عبد الوهاب في عداد أهل العلم من الحنابلة وقد ذكر نحو ثمانين مفتى عالم وعالمة في المذهب الحنبلي بل ذكر أبا عبد الوهاب وأثنى عليه بالعلم وذكر أن أبا عبد كان غضبان عليه وحذر منه وكان يقول "يا ما ترون من محمد من الشر" وكان الشيخ محمد بن حميد ثوّي بعد محمد بن عبد الوهاب بنحو ثمانين سنة.

### **Reddinta Maxamad Bin Cabdulwahhaab**

Waxaa sidoo kale reddiyay caalimkii caanka ahaa muftigii Maka ee Xanaabilada Maxamad Bin Xumayd, mana uusan ku xisaabin Maxamad Bin Cabdulwahhaab culumada xanaabilada, wuxuuna sheegay in ku dhaw siddeetan caalim iyo caalimad oo mad-habta Xambaliyada raacsan, taa daaye wuxuu xusay aabihiis Cabdulwahhaab oo uu ku ammaanay cilmiga, wuxuuna sheegay in (Maxamad Bin Cabdulwahhaab) aabihiis uu u caraysnaa oo uu ka digay wuxuuna dhihi jiray: "Badanaa waxyaabaha aad maxamad ku arki doontaan ee sharta ah" Sheekh Muxamad Bin Xumaydina wuxuu dhintay Maxamad Bin Cabdulwahhaab kadib siddeesan sano qyaastii.

وقد أحدثَ محمدُ بنُ عبدِ الوهابِ هذا دينًا جديداً علَمَه لاتباعِه وأصلَهُ هذا الدينِ تشبيهُ اللهِ بخلقهِ واعتقادُ أنَّ اللهَ حسْمٌ قاعدٌ على العرشِ وهذا تشبيهُ اللهِ بخلقهِ لأنَّ القعودَ من صفاتِ البشرِ فقد خالفَ بذلك قولَ اللهِ تعالى: ﴿لَيْسَ كَمُثْلِهِ شَيْءٌ﴾ [الشورى: 11]. وقد اتفقَ السلفُ الصالحُ على أنَّ من وصفَ اللهَ بصفةٍ من صفاتِ البشرِ فقد كفرَ كما قالَ الإمامُ المحدثُ السلفيُّ الطحاويُّ في عقيدته المشهورة باسمِ العقيدة الطحاوية ما نصه: "ومن وصفَ اللهَ بمعنىِ من معاني البشرِ فقد كفرَ".

### **Diin Cusub oo bidco ah**

Maxamad Bin Cabdulwahhaab kaas, diin bidco ah oo cusub ayuu keenay oo uu baray dadkii asiga raacsanaa diinkaasna wuxuu ku salaysanyahay shabbihidda Eebbe lagu shabbahayo khalqigiisa, iyo ictiqaadka ah in Eebbe uu jismi yahay oo uu carshiga ku fadhiyo, taasina waa ekaysiin Eebbe loo ekaysiinayo uunkiisa, maxaa yeelay fadhigu waa astaamaha adanaha lagu yaqaan wuxuuna halkaa ku khilaafay qowlkii Eebbe kor ahaayee: ﴿Wax ekaankiis ah ma jiraan﴾[as-Shuuraa:11]. Salafkii suubbanaana waxay isku raaceen in qofkii Eebbe ku asteeyaa wax ka mid ah astaamaha aadanaha uu kufriyay sida uu yiri Imaamkii Muxadiska ahaa ee Selefiga ahaa ad-Daxaawi kuna sheegay caqidiadiisa caanka ah ee loo yaqaan "Caqidada Daxaawiyada" wuxuu yiri: "Qofkii Eebbe ku asteeyaa wax ka mid ah astaamaha aadanaha wuu kufriyay".

ومن عقيدة هذه الجماعة الوهابية تكفيرُ من يقولُ يا محمد وتكفيرُ من يزورُ قبورَ الأنبياءِ والأولياءِ للتبركِ وتكفيرُ من يتمسّحُ بالقبرِ للتبركِ وتكفيرُ من يعلقُ على صدرِه حزراً فيه قرآنٌ وذكرُ اللهِ ويجعلونَ ذلك كعبادة الصنمِ والوثنِ وقد خالفوا بذلك ما كان عليه الصحابةُ والسلفُ الصالحُ فقد ثبتَ حوازُ قولِ يا محمد عند الشدةِ عنِ الصحابةِ ومن بعدهم من السلفِ الصالحِ ومن بعدهم في كلِّ العصورِ التي مضت على المسلمين.

## Caqiidada Wahhaabiyada

Waxaana ka mid ah caqiidada kooxdan Wahhaabiyada in ay kufriyaan qofkii yiraahda "yaa Muxammad" iyo kufrinta qofkii soo booqda qabuuraha Nabiyaasha iyo Awliyada eek u barakaysta iyo kufrinta qofkii taabsada qabri asiga oo ku barakaysanaya iyo kufrinta qofkii qoortiisa ku xira xirsi uu ku qoranyahay Quraan iyo xusidda Ilahay waxayna waxaa ka dhigayaan cibaadada sanamka iyo dhagaxa waxayna taa ku khilaafeen wixii asaxaabtu haysteen iyo salafkii suubbanaa, maxaa yeelay waxaa sugnaaday in ay bannaantahay in la dhihi karo "yaa Muxammad" marka dhibaato timaado waxayna taa ka sugnaatay asaxaabta iyo intii ka dambaysay ee selefka suubban ahaa iyo wixii ka dambeeyay dhammaan quruumihii ay soo mareen Muslimiintu.

وقد نصَّ الإمامُ أَحْمَدُ بْنُ حِبْلَ الَّذِي هُمْ يَنْتَسِبُونَ إِلَيْهِ فِي بَلَادِهِمْ عَلَى جَوَازِ مَسْقُبِ النَّبِيِّ وَمَسْقُبِ مِنْبِرِهِ وَتَقْبِيلِهِمَا إِنْ كَانَ تَقْرُبًا إِلَى اللَّهِ بِالْتَّرْكِ وَذَلِكَ فِي كِتَابِهِ الْمُشْهُورِ. وَقَدْ شَذُوا عَنِ الْأُمَّةِ بِتَكْفِيرِ مَنْ يَسْتَغْبِثُ بِالرَّسُولِ وَيَتَوَسَّلُ بِهِ بَعْدِ مَوْرِهِ قَالُوا التَّوَسُّلُ بِغَيْرِ الْحَاضِرِ كُفُّرٌ فَعَمَلاً بِهَذِهِ الْقَاعِدَةِ الَّتِي وَضَعُوهَا يَسْتَحْلُونَ تَكْفِيرَ مَنْ يَخَالِفُهُمْ فِي هَذَا وَيَسْتَحْلُونَ قَتْلَهُ، إِنَّ زَعِيمَهُمْ مُحَمَّدَ بْنَ عَبْدِ الْوَهَابِ قَالَ: "مَنْ دَخَلَ فِي دُعْوَتِنَا فَلَمْ يَدْخُلْ فَهُوَ كَافِرٌ مُبَاخُ الدَّمِ".

## Imaam Axmad ayaa banneeyay tawasulka

Wuxuuna caddeeyay Imaam Axmad Bin Xambal, oo ah midka ay sheeganayaan dalkooda dhexdiisa, in ay bannaantahay taabashada qabriga nabiga iyo taabashada mimbarkiisa iyo dhunkashadooda haddii ay tahay mid Eebbe loogu dhawaanayo ayada oo lagu barakaysanayo wuxuuna ku sheegay kitaabkiisa caanka ah. Waxayna ka fallaagoobeen (Wahhaabiyadu) Ummadda kolkii ay kufriyeen qofkii waydiista kaalme Rasuulka ee ku tawasula dhimashadiisa ka dib, waxay dhaheen tawasulka aan ahayn midka lagu tawasulo qof nool oo jooga waa kufri, kolka ayaga oo qaacidadaas ay ayagu dhigteen ku howlgelaya ayay bannaysteen kufrinta qofkii arrinkaa ku khilaafa oo ay dilkiisa bannaysanayaan, maxaa wacay kii madaxda u ahaa ee ahaa Maxamad Bin cabdulwahhaab ayaa yiri: "qofkii soo gala diintenna wuxuu leeyahay wixii aan annagu leenahay (ee xaqquq ah) wixii nalaku leeyahayna waa lagu leeyahay, qofkii aanan soo gelinna waa kaafir dhiiggiisu bannaanyahay".

وَمَنْ أَرَادَ التَّوْسُّعَ فِي مَعْرِفَةِ الْأَدْلَةِ الَّتِي تَنْقُضُ كَلَامَهُمْ هَذَا فَلِيُطَالِعْ كَتَبَ الرَّدِّ عَلَيْهِمْ كَكِتَابَ "الرَّدُّ الْمُحْكَمُ الْمَتَيْنِ" وَكِتَابَ "الْمَقَالَاتُ السُّنْنِيَّةُ" فِي كَشْفِ ضَلَالَاتِ أَحْمَدَ بْنِ تَيْمَةَ وَهَذَا الْكِتَابُ الثَّانِي أُسْسِيَ هَذَا الاسمُ لِأَنَّ مُحَمَّدَ بْنَ عَبْدِ الْوَهَابِ أَخْذَ تَحْرِيمَ التَّوَسُّلِ إِلَى الْحَاضِرِ مِنْ كِتَابِ ابْنِ تَيْمَةِ الْمُتَوفِّي سَنَةَ 728هـ. مَعَ أَنَّ ابْنَ تَيْمَةَ اسْتَخْسَنَ لِمَنْ أَصَابَهُ مَرْضُ الْخَدْرِ فِي رَجْلِهِ أَنْ يَقُولَ يَا مُحَمَّدُ وَهَذَا صَحِيحٌ ثَابَتْ عَنِ ابْنِ تَيْمَةِ فِي كِتَابِ "الْكَلْمُ الطَّيِّبِ" وَهَذَا يَخَالِفُ فِيهِ مَا قَالَهُ فِي كِتَابِ "الْتَّوَسُّلُ وَالوَسِيلَةُ"، فَمُحَمَّدُ بْنُ عَبْدِ الْوَهَابِ وَافْقَهَ فِيمَا فِي كِتَابِهِ "الْتَّوَسُّلُ وَالوَسِيلَةُ" وَحَالَفَهُ فِيمَا فِي كِتَابِهِ "الْكَلْمُ الطَّيِّبِ". وَالْخَدْرُ مَرْضٌ مَعْرُوفٌ عِنْدَ الْأَطْبَاءِ يَصِيبُ الرَّجُلَ.

## Addillada burrinaysa hadalkooda

Qofkii doona in uuogaado addillada burrinaysa hadalkoodaas ha akhriyo kutubta lagu raddiyay sida kitaabka "ar-Raddu al-Muxkamu al-Matiinu" iyo kitaabka "al-Maqaalaatu as-Sunniyadu fi kashfi dalaalaati Axmad Bin Taymiyah" kaas oo dhintay sanadkii 728H. Inkasta oo Ibn Taymiyah jeclaystay in qofkii uu ku dhaco qallal lugtiisa uu yiraahdo "yaa Muxammad", taasina waa arrin sugar oo Ibn Taymiyyah ku yiri kitaabkiisa "al-Kelim ad-Dayyib" wuxuuna halkaa ku khilaafay wuxuu ku yiri kitaabkiisa "at-Tawasul wal-Wasiilah", kolka Maxamad Bin Cabdulwahhaab wuxuu ku raacay waxa ku qoran kitaabka "at-Tawasul wal-Wasiilah" wuxuuna ku khilaafay waxa ku yaalla kitaabka "al-Kelim ad-Dayyib" qallalkuna waa jirro ay dhaqaatiirtu taqaan oo ku dhaca lugta.

وَأَمَّا حُزْبُ الْإِخْرَانِ فَإِنَّهُمْ اتَّبَعُوا سِيدَ قَطْبٍ فِي قَوْلِهِ مِنْ حُكْمٍ بَغَيْرِ الْقُرْءَانِ وَلَوْ فِي حُكْمٍ وَاحِدٍ فَقَدْ رَدَّ الْوَهْيَةَ وَادَّعَى الْأَلْوَهِيَّةَ لِنَفْسِهِ مُحْتَاجًا بِقَوْلِ اللَّهِ تَعَالَى: ﴿وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ﴾ سورة المائدة/44. واستحلَّ بذلك دماءُ الْحَكَامِ الَّذِينَ يَحْكُمُونَ بِالْقَانُونِ وَدَمَاءَ الرَّعَايَا، وَتَفْسِيرُهُ هَذَا لِهَذِهِ الْآيَةِ مُخَالِفٌ لِمَا فَسَرَّ بِهِ الْآيَةَ عَبْدُ اللَّهِ بْنُ عَبَاسٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا إِنْ عَمِ الرَّسُولُ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ وَهُوَ الْمَعْرُوفُ بِتَرْجِمَانِ الْقُرْءَانِ وَالرَّسُولُ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ دَعَا لِهِ بِفَهْمِ الْقُرْءَانِ، فَفِي صَحِيحِ الْبَخَارِيِّ الْجَلْدِ الْأَوَّلِ صَحِيفَةِ 25 بَابِ قَوْلِ النَّبِيِّ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: "اللَّهُمَّ عَلِمْهُ الْكِتَابَ" أَنَّ الرَّسُولَ عَلَيْهِ السَّلَامُ التَّرَمَدَهُ وَقَالَ: "اللَّهُمَّ عَلِمْهُ الْكِتَابَ". وَقَالَ أَيْضًا "اللَّهُمَّ فَقِهْهُ فِي الدِّينِ وَعِلْمْهُ التَّأْوِيلِ" أَيْ تَفْسِيرِ الْقُرْءَانِ وَهَذَا أَيْضًا حَدِيثٌ صَحِيفَةِ رَوَاهُ ابْنُ حَبَّانَ.

## Xisbiga Ikhwaanka

Xisbiga Ikhwaanku waxay waxay ku raaceen Sayid Quddub hadalkiisii ahaa qofkii wax aan quraanka ahayn wax ku xukuma hal xukunba ha ahaadee wuxuu diiday Ilahnimada Eebbe wuxuuna sheegtag Ilahnimmo asiga oo ku murmay qowlkii Ilahay kor ahaayee: ﴿Qofkii aan wax ku xukumin wuxuu Eebbe soo dejiyay (ee Quraanka ah) kuwaasi waa kaafiriin﴾[al-Maa'idah:44]. Sidaas ayuuna ku xalaalaystay dhiigga madaxda wax ku xukumaya qaunuunka iyo dhiigga dadwaynaha intaba, tafsiirkha uu aayadda fasirayna wuxuu khilaafsanyahay tafsiirkii uu aayaddan ku fasiray Cabdullaahi Bin Cabbaas asiga iyo aabbihiiiba Allaha ka raalli noqdee, kaas oo ah Nabiga ina adeerkiis, naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee, wuxuuna ku can baxay (Cabduallaahi Bin Cabbaas) in uu yahay turjumaankii quraanka, Rasuulka Naxariis iyo Nabadgelyo korkiisa ha ahaatee ayaana ugu duceeyay fahmada quraanka. Kitaabka saxiixul Bukhaari, Mujalladka koobaad, baalka 25aad, baabka qowlkii Nabiga naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee: "Eebbow kitaabka bar", ayay ku taal in uu Nabiga naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee uu wadan jiryay oo yiri: "Eebbow kitaabka bar" waxaa kale ee uu yiri: "Eebbow fahamsii diinka ta'wiilkana bar" oo ah tafsiirkha quraanka, kaasina waa xaddiis saxiix ah oo uu soo weriyay Ibn Xibbaan.

وَخَالَفَ لِتَفْسِيرِ غَيْرِ ابْنِ عَبَّاسٍ مِنَ الصَّحَابَةِ وَمَنْ تَبَعَّهُمْ إِلَى يَوْمِنَا مِنْ عُلَمَاءِ إِلَسْلَامٍ فَإِنَّهُ ثَبَّتَ عَنْ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَبَّاسٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُ مَا ذَكَرَهُ الْحَاكُمُ فِي الْمُسْتَدْرَكِ وَهَذَا نَصْهُ فِي صَحِيفَةِ 313 مِنَ الْجَزْءِ الثَّانِي: "أَخْبَرَنَا أَحْمَدُ

بن سليمان الموصلي ثنا علي بن حرب ثنا سفيان بن عيينة عن هشام بن حمير عن طاووس قال: قال ابن عباس رضي الله عنهما: إنَّهُ لِيُسَّ بِالْكُفْرِ الَّذِي يَذْهَبُونَ إِلَيْهِ إِنَّهُ لِيُسَّ كُفُّرًا يَنْقُلُ عَنِ الْمَلَةِ 《وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ》 كُفُّرٌ دُونَ كُفُّرٍ". هذا حديث صحيح الإسناد إهـ.

### Kufriga aan kufriga wayn ahayn

Waxaa kale oo uu khilaafsanyahay (tafsiirka Sayyid quddub) tafsiirrada aan ahayn tafsiirka Ibn Cabbaas ee ka mid ah tafsiirkii asaxaabta iyo intii raacdya ilaa maantadan ee culumada Islaamka, maxaa wacay waxaa ka sugnaaday cabdullaahi Bin Cabbaas Allaha ka raalli noqdee warka uu ku soo weriyay al-Xaakim kitaabkiisa al-Mustadrak, juska labaad, baalka 313 ee xarfahiisu yihiin: "wuxuu inoo warramay Axmad Bin Sulaymaan al-Musiliyi, waxaa inoo sheegay Cali Bin Xarb, waxaa inoo sheegay Sufyaan Bin Cuyaynah, can Hashim Bin Xujayr, can Daawuus, wuxuu yiri: Ibn Cabbaas wuxuu yiri Allaha ka raalli noqdee: kufrigaasi ma aha kufriga ay u malaynayaan, ma aha kufriga diinta looga baxayo 《Qofkii aan wax ku xukumin wuxuu Eebbe soo dejiyay (ee Quraanka ah) kuwaasi waa kaafiriin》 waa kufri kaa ka sokeeya". Kanina waa xaddiis sanadkiisu sax yahay.

وقولُ ابنِ عَبَّاسٍ كُفُّرٌ دُونَ كُفُّرِ نَظِيرِهِ الرِّيَاءُ فَإِنَّ الرَّسُولَ سَمَّاً الشَّرَكَ الْأَصْغَرَ أَيْ لَيْسَ الشَّرَكَ الْأَكْبَرَ الَّذِي يَنْقُلُ عَنِ الْمَلَةِ الَّذِي هُوَ نَهايَةُ التَّذَلُّلِ لِغَيْرِ اللَّهِ فَإِنَّهُ هَذَا الشَّرَكُ هُوَ الَّذِي يَنْقُلُ عَنِ الْمَلَةِ فَقَدْ رُوِيَ الْحَاكُمُ فِي الْمُسْتَدِرِ عَنِ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنَّهُ قَالَ: "اتَّقُوا الرِّيَاءَ فَإِنَّهُ الشَّرَكُ الْأَصْغَرُ" ، فَنَقُولُ كَمَا أَنَّ الرَّسُولَ أَثْبَتَ الشَّرَكَ الْأَصْغَرَ كَذَلِكَ عَبْدُ اللَّهِ بْنُ عَبَّاسٍ فَسَرَّ قَوْلَ اللَّهِ تَعَالَى: 《فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ》 كُفُّرٌ دُونَ كُفُّرٍ أَيْ لَيْسَ الْكُفْرُ الَّذِي يَنْقُلُ عَنِ الْمَلَةِ، فَرَضَيَ اللَّهُ عَنْ حِبْرِ الْأَمَّةِ تَرْجِمَانِ الْقَرْءَانِ عَبْدُ اللَّهِ بْنُ عَبَّاسٍ رَضِيَ اللَّهُ عَنْهُمَا وَجْزَاهُ اللَّهُ عَنِ الْمُسْلِمِينَ خَيْرًا.

Hadalka Ibn Cabbaas ee ah "waa kufri kaa ka sokeeya" waa sida istustuska maxaa yeelay nabiga ayaa ku magacaabay shirki yar in uu yahay (istustusku) ujeedaduna waa in uusan shirkiga wayn ahayn kaas oo diinta qofka ka saaraya, oo ah in la caabudo cid aan Eebbe ahayn, maxaa yeelay shirkigan ayaa ah midka qofka diinta ka saaraya, Xaakim ayaana uga soo weriyay kitaabkiisa Mustadrak Rasuulka naxariis iyo nabadgelyo korkiisa ha ahaatee in uu yiri: "

وَبِيَانٍ ذَلِكَ أَنَّ الْمَعَاصِيَ الْكَبَائِرَ كُتُلِّ مُسْلِمٍ وَتَرَكَ الصَّلَاةَ وَرَدَ أَنَّهُ كُفُّرٌ فِي أَحَادِيثَ صَحِيحَةِ الْإِسْنَادِ وَلَيْسَ مَرَادُ الرَّسُولِ بِذَلِكَ الْكُفْرِ الَّذِي يُخْرُجُ مِنَ الْمَلَةِ أَيْ أَنَّ مَنْ فَعَلَ ذَلِكَ يُخْرُجُ مِنَ الدِّينِ، إِنَّمَا مَعْنَاهُ تَشْبِيهُ هَذِهِ الْمَعَاصِي بِالْكُفْرِ، كَالَّذِي وَرَدَ عَنْ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنَّهُ قَالَ فِيمَنْ يَذْهَبُ إِلَى الْكُهُانِ فَيَصْدُّهُمْ وَهُوَ قَوْلُهُ عَلَيْهِ السَّلَامُ: "مَنْ أَتَى عَرَافًا أَوْ كَاهِنًا فَصَدَّقَهُ بِمَا يَقُولُ فَقَدْ كُفِرَ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ عَلَى مُحَمَّدٍ" وَهُوَ حَدِيثٌ صَحِيحٌ.

Taas caddaynteeduna waa in dambiyada kabaa'irta ah sida qof Muslim ah oo la dilo iyo salaadda oo laga tago waxaa soo arooray in ay kufri yihiin axaadiis sanadkoodu saxiix yahay, nabiga ujeeddadiisuna ma ahayn kufriga diinta ka bixinaya qofka taas oo ah in qofkii fala waxaa uu diinka ka baxayo, waxaase looga jeedaa in dambiyada jaadkaas ah loo ekaysiiyay kufriga, sidi midka laga soo weriyay nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, oo ah in uu ku yiri qofkii aada faalshoga ee rumaysta, kaas oo ah qowlkiisii nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee: "Qofkii u yimaada faalshow ama saaciye ee rumaysta waxa uu sheegayo wuu kufriyay wixii lagu soo dejiyay Muxammad" waana xaddiis saxiix ah.

وليس مرادُ الرسولِ أَنَّ المُسْلِمَ مُجْرِدًا أَن يذهبَ إِلَى هُؤُلَاءِ الْكُهَّانِ وَيُصَدِّقُهُمْ خَرْجَ مِنَ الْإِسْلَامِ إِنَّمَا مَرَادُ الرَّسُولِ أَنَّ هَذَا ذَنْبٌ كَبِيرٌ يُشَبِّهُ الْكُفَّارَ . وَقَالَ أَيْضًا " سِبَابُ الْمُسْلِمِ فُسُوقٌ وَقَتَالُهُ كُفُّرٌ " . فَقُولُهُ وَقَتَالُهُ كُفُّرٌ لَا يَرِيدُ بِهِ أَنْ قَتَالَ الْمُسْلِمِ لِلْمُسْلِمِ كُفُّرٌ يُخْرُجُ مِنَ الدِّينِ إِنَّمَا الْمَرَادُ أَنَّهُ ذَنْبٌ كَبِيرٌ يُشَبِّهُ الْكُفَّارَ لِأَنَّ الْقُرْءَانَ الْكَرِيمَ سَمَّى الْفَتَّيْنِ الْمُتَقَاتَلَتَيْنِ مِنَ الْمُسْلِمِينَ مُؤْمِنِيْنَ قَالَ تَعَالَى : ﴿ وَإِنْ طَائِفَتَانِ مِنَ الْمُؤْمِنِيْنَ اقْتَلُوَا ﴾ [الحجرات:9].

### **Qofkii Faalshow Rumaysta Islaamka ma ka baxayaa?**

Ujeeddada Nabiguna maaha in qofka muslimka ah haddiiba uu qoladaa faalshowga ah aado oo uu rumaysto uu Islaamka ka baxayo, taa ma aha e' ujeeddada nabigu waa in taasi dambi wayn tahay oo u eg gaalnimada. Waxaa kale ee uu yiri: "Cayda qofka muslimka ah waa faasiqromo la dagaallankiisuna waa kufri" kolka weedhiisa ah "la dagaallankiisuna waa kufri" ugama jeedo in la dagaallanka muslimku uu la dagaallayo muslim kale ay kufri tahay qofka diinta ka bixinaya ee waxaa looga jeedaa in uu dambi wayn yahay oo kufriga u eg, maxaa yeelay quraanka kariimka ah ayaa labadii kooxood ee isdagaalaya ee muslimiint ka mid ah ku magacaabay mu'miniin, wuxuu yiri (Eebbe) kor ahaayee: ﴿Haddii laba kooxood oo mu'miniinta ka mid ah dagaallamaan﴾[al-Xujuraat:9].

ثم إنَّهُ وردَ في صحيح مسلمٍ عنِ البراءِ بنِ عازبٍ الصحابيِّ المشهورِ أَنَّهُ قَالَ: إِنَّ هَذِهِ الْآيَةَ ﴿ وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ ﴾ وَالآيَتَيْنِ الَّتِيْنِ بَعْدَهَا فِي إِحْدَاهُمَا ﴿ فَأُولَئِكَ هُمُ الظَّالِمُونَ ﴾ وَفِي الْأُخْرَى ﴿ فَأُولَئِكَ هُمُ الْفَاسِقُونَ ﴾ نَزَلَتْ كُلُّهَا فِي الْكُفَّارِ أَيِّ الَّذِيْنَ يَحْكُمُونَ بِغَيْرِ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ وَلَيْسَ الْمُسْلِمِيْنَ الَّذِيْنَ يَحْكُمُونَ بِغَيْرِ مَا أَنْزَلَ اللَّهُ إِنَّمَا هِيَ فِي الْيَهُودِ وَمَنْ كَانَ مِثْلَهُمْ .

Intaa kadib waxaa ku soo arooray Saxiixul Muslim oo laga soo weriyay al-Baraa' bin Caasib oo ah saxaabi caan ah in uu yiri: Aayaddan ﴿Qofkii aan wax ku xukumin wuxuu Eebbe soo dejiyay (ee Quraanka ah) kuwaasi waa kaafiriin﴾ iyo labada aayadood ee ka dambaysa ee middood ay ku jirto ﴿kuwaasi waa dulmilowsho﴾ midda kale ay ku jirto ﴿kuwaasi waa faasiqiin﴾ waxay ku soo degeen dhammaantood gaalada oo ah kuwa ku xukumaya wax aanan Ilaalay soo dejin mana aha Muslimiinta ku xukumaya wax aan Eebbe soo dejin ee waa yahuudda iyo wixii la mid ah.

وفي كتاب أحكام النساء للإمام أحمد بن حنبل مثل ما رواه الحاكم عن ابن عباس ففيه ما نصه في صحيفة 44: أخبرني موسى بن سهل قال حديثنا موسى بن أحمد الأستاذ وأخبرنا إبراهيم بن يعقوب عن إسماعيل بن

سعید قالَ سأّلْتُ أَحْمَدَ عَنِ الْمُصْرِّ عَلَى الْكَبَائِرِ بِجُهْدِهِ إِلَّا أَنَّهُ لَمْ يَتُرُكِ الصَّلَاةَ وَالصُّومَ وَالزَّكَاةَ وَالْحَجَّ وَالْجَمَعَةَ هُلْ يَكُونُ مُصِرًا فِي مُثْلِ قَوْلِهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ: "لَا يَزِنِي الزَّانِي حِينَ يَزِنِي وَهُوَ مُؤْمِنٌ وَلَا يَشْرَبُ الْخَمْرَ حِينَ يَشْرِبُهَا وَهُوَ مُؤْمِنٌ وَلَا يَسْرِقُ حِينَ يَسْرِقُ وَهُوَ مُؤْمِنٌ" ، وَمِنْ نَحْوِ قَوْلِ ابْنِ عَبَّاسٍ ﴿وَمَنْ لَمْ يَحْكُمْ بِمَا أَنْزَلَ اللَّهُ فَأُولَئِكَ هُمُ الْكَافِرُونَ﴾ قَلْتُ: فَمَا هَذَا الْكُفُرُ، قَالَ: كُفُرٌ لَا يُخْرِجُ مِنَ الْمِلَّةِ فَهُوَ درجاتٌ بَعْضُهُ فَوْقَ بَعْضٍ حَتَّى يَجِيءَ مِنْ ذَلِكَ أَمْرٌ لَا يَخْتَلِفُ النَّاسُ فِيهِ، فَقَلَّتْ لَهُ: أَرَأَيْتَ إِنْ كَانَ خَائِفًا مِنْ إِصْرَارِهِ يَنْوِي التَّوْبَةَ وَيَسْأَلُ ذَلِكَ وَلَا يَدْعُ رُكُوبًا (أَيْ وَلَا يَتَرَكُ فَعْلَ الْمُعَاصِي) قَالَ الَّذِي يَخَافُ أَحْسَنُ حَالًا. انتهى ما في كتاب الإمام أحمد رضي الله عنه.

### **Qofkii ku madax adayga dambiyada waawayn**

Kitaabkii (Axkaam an-Nisaa') ee Imaam Axmad Bin Xambal waxaa ku yiilay waxa Xaakim ka soo weriyay Ibn Cabbaas, waxaa ku soo arooray bogga 44aad: waxaa iiwarramay Muuse Bin Sahal wuxuu yiri: waxaa inoo sheegay Muuse Bin Axmad al-Asadi, waxaa inoo warramay Ibraahiiim Bin Yacquub oo ka sheegay Ismaaciil bin Saciid wuxuu yiri: waxaan waydiiyay Axmad qofkii ku madax adayga dambiyada waawayn (kabaa'irta) eek u dheggan, laakiin aan ka tegayn salaadda iyo soonka iyo sekada iyo xajka iyo jimcada, miyuu noqonayaa sidi kii ku madax adayga sida waxa uu sheegay (Nabigu) nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee: "Dhillaygu kolka uu dhillaysanayo ma dhillaysto asiga oo mu'min ah, khamrada kolka uu cabbayana ma cabbo asiga oo mu'min ah, kolka uu xadayana ma xado asiga oo mu'min ah" iyo waxy la mid ah tafsiirkii Ibn Cabbaas ee: ﴿Qofkii aan wax ku xukumin wuxuu Eebbe soo dejiyay (ee Quraanka ah) kuwaasi waa kaafiriin﴾ waxan iri: muxuu yahay kufrigani? Wuxuu yiri (Imaam Axmad): waa kufri aanan diinta qofka ka saarayn kolka waa rerejooyin (kufrigu) qaarkood qaarka kale ka daranyihiin, inta laga gaarayo wax aanan dadku isku khilaafsanayn. Kolkaas baan ku iri: ka warran haddii uu ka cabsanayo madaxadayggiisa oo uu doonayo in uu towbad keeno oo uu sidaa waydiinayo uusanna ka tegayn falidda (falidda dambiyada uusan ka tegayn), wuxuu yiri: midka cabsanaya ayaaba roon. Halkaas ayay ku dhamaadeen wixii ku qorraa kitaabkii Imaam Axmad Allaha ka raalli noqdee.

وَلَمْ يَصَحَّ بِالْإِسْنَادِ الصَّحِيحِ عَنِ الصَّحَابَةِ فِي تَفْسِيرِ هَذِهِ الْآيَةِ إِلَّا هَذَا التَّفْسِيرُ إِنْ تَفْسِيرِ عَبْدِ اللَّهِ بْنِ عَبَّاسٍ وَتَفْسِيرِ الْبَرَاءِ وَعَلَى ذَلِكَ درَجَ عُلَمَاءِ الْإِسْلَامِ إِلَى قَرِيبٍ مِنْ مُنْتَصَفِ الْقَرْنِ الرَّابِعِ عَشَرَ الْمَهْجَرِيِّ، ثُمَّ ظَهَرَ هَذَا الرَّجُلُ سِيدُ قَطْبِ فِي مَصْرَ فَعَمِلَ تَفْسِيرًا لِلْقُرْءَانِ يُكَفِّرُ فِيهِ مِنْ حَكْمَ بَغْيِ الْقُرْءَانِ وَلَوْ فِي مَسْأَلَةٍ وَاحِدَةٍ أَيْ مَعَ حَكْمِهِ بِالشَّرْعِ فِي سَائِرِ الْأَحْكَامِ وَيُكَفِّرُ رِعْيَةً ذَلِكَ الْحَاكِمِ، وَالْيَوْمَ لَا يَوْجُدُ فِي الْبَلَادِ الْإِسْلَامِيَّةِ حَاكِمٌ إِلَّا وَيَحْكُمُ بَغْيِ الشَّرْعِ فِي قَضَائِيَا كَثِيرَةٍ مَعَ حَكْمِهِمْ فِي عِدَّةِ مَسَائِلٍ بِالشَّرْعِ فِي الطَّلاقِ وَالْمِيرَاثِ وَالنَّكَاحِ وَالْوَصِيَّةِ يَحْكُمُونَ بِحُكْمِ الْقُرْءَانِ.

Kuma sugnaan sanad sax ah oo asaxaabta laga soo weriyay tafsiirka aayaddan wax aan ahayn labadaa tafsiir ee Cabdullaahi Bin Cabbaas iyo tafsiirka al-Baraa' sidaa darted taas ayay raaceen culumada Islaamku intii laga soo gaaray mar u dhow kala barkii qarnigii afar iyo tobnaad ee hijriga, kadibna waxaa ka soo baxay Masar ninkan Sayid Qudub kolkaas buu qoray tafsiirka quraanka kaas oo uu ku kufriyax qofkii wax ku xukuma wax aanan quraanka

ahayn mas'alo kaligeed ahba ha ahaatee asiga oo sharciga ku xukumaya axkaamta kale oo dhan, wuxuuna kufriyay bulshada xaakimkaas, maantana lagama helo caalamka Islaamka xaakim aanan wax ku xukumayn qaunuunka arrimo farabadan isla markaana ay sharciga ku xukumayaan arrimo kale sida furitaanka iyo dhaxalka iyo guurka iyo dardaaranka waxay ku xukumayaan xukunka quraanka.

ومع هذا سيد قطب وأتباعه يكفرون رعاياهم ويستحلون قتلهم بأي وسيلة استطاعوها بالسلاح والتفجير وغير ذلك إلا من قام معهم فشار على الحكم. وليس سيد قطب سلف في ذلك إلا الخوارج فإنهما كانوا يكفرون المسلمين لارتكاب العصية كالرُّزْنِي وشرب الخمر والحكم بغير الشرع للرُّشْوَة أو الصدقة أو القرابة، فسيد قطب كان عاش على الإلحاد إحدى عشرة سنة وذلك باعترافه ثم جاء إلى حزب الإخوان الذين كان جعهم الشيخ حسن البنا رحمة الله، ثم في حياة حسن البنا انحرف سيد قطب وءاخرؤ عن منهجه الذي كان منهجاً سالياً ليس فيه تكفير المسلمين إذا حكم بغير الشرع، فعلم الشيخ حسن بانحرافهم فقال هؤلاء ليسوا إخواناً وليسوا مسلمين.

### Kufrinta Madaxda iyo Bulshada

Ayada oo sidaa ah Sayid Qudub iyo kuwa raacsan kufrinayaan (madaxdaas), waxaa kale ee ay kufrinayaan bulshadooda, waxayna bannaysanayaan dilkooda sikasta oo ay u awoodaan ama hub ha ahaato ama qarxin iwm, qofkii ayaga raaca ee madaxda ka soo horjeesta intaan ahayn. Sayid Qudubna cidi ugama horreyn waxaas aan ahayn Khwaarijta maxaa yeelay ayaga ayaa kufrin jiray muslimka falaya dambiyada sida dhillaysiga iyo khamra cabidda ama sharciga wax aan ahayn oo wax lagu xukumo laaluush dartiis ama saaxiibtinimo ama qaraabo ahaan, kolka sayid Qudub wuxuu ku soo jiray gaalnimo kow iyo toban sano asiga ayaana qirtay kadibna wuxuu soo galay xisbigii Ikhwaanka kaas oo uu abuuray Sheekh Xasan al-Bannaa Allaha u naxariistee, kadibna intii Xasan al-Bannaa noolaay ayaa Sayid Qudub habaabay iyo qaar kale oo ka leexdeen jidkii uu u dhigay (Sheekh Xasan), kaas oo ahaa jid toosan oo aan kufrinta Muslimka ku jirin haddii uu wax ku xukumo wax aanan sharciga ahayn, kolkaas baa Sheekh Xasan ka war helay leexadkoodaas, kolkaas buu yiri: kuwaasi ikhwaan maaha muslimiinna maaha.

وقد ذكر الشيخ محمد الغزالى وكان من أتباع الشيخ حسن البنا في كتابه "من معلم الحق" في صحيفة 264 ما نصه: "وكان الأستاذ حسن البنا نفسه وهو يؤكّف جماعته في العهد الأول يعلم أنَّ الأعيانَ والوجهاءَ وطلابَ التسلية الاجتماعية الذين يكترون في هذه التشكيلات لا يصلحون لأوقاتِ الجدِّ. فأَلَّفَ ما يُسمى بالنظامِ الخاصِّ، وهو نظامٌ يضم شباباً مُدرِّبينَ على القتالِ، كان المفروضُ من إعدادِهم مقاتلةَ المحتلينَ الغزاةِ. وقد كان هؤلاءِ الشبابُ الأخفاءُ شرًّا وبيلاً على الجماعةِ فيما بعدُ، فقد قتل بعضُهم بعضاً وتحوّلوا إلى أداءِ تخريبِ وإرهابٍ في يدِ من لا فقه لهُم في الإسلامِ ولا تعويلٍ على إدراكيِّهم للصالحِ العامِ. وقد قال حسن البنا فيهم قبل أن يموتَ إنَّهم ليسوا إخواناً وليسوا مسلمين". أهـ

## Xaqeeqada Kooxda Ikhwaanka

Waxaana taa caddeeyay Sheekh Maxamad al-Qasaali oo ka mid ahaa dadkii raacsanaa Xasan al-Banna, wuxuuna ku yiri kitaabkiisa "Min Macaalim al-Xaq" baalka 264 sidan: "Wuxuuna ahaa Sheekh Xasan al-Banna laftirkiisu asiga oo ururinaya jamaacadiisa waagii hore mid baraya in madaxda iyo gobta iyo kuwa bulshada madadaaladeeda doonaya ee ku badan qaabankaa kuma habboona waqtiyada dhabta ah. Kolkaas buu qoray waxa loo yaqaan maamulka gaarka ah waana maamul koobaya dhallinyaro loo tababaray dagaalka, waxaana loogu tala galay habayntooda si loogula dagaallamo kuwii soo duulay ee meesha qabsaday. Waxayna ku noqdeen jamaacada dhallinyaradaas qarsoon shar hoog ah markaa kadib, maxaa yeelay qaarkoodba qaarkii kale ayay dileen, waxayna isu bedeleen qalab wax khariba iyo argagixiso kolkay hoos yimaadeen maamulka qaar aan Islaamka fahamsanayn oo aanan garaadkooda laygu halayn Karin maslaxadda guud. Xasan al-Bannaana wuxuu ka yiri kuwaa intii uusan dhiman, kuwaasi ikhwaan maaha muslimiinna maaha".

ثم كثيرون من الناس انفتثوا بتفسير سيد قطب هذا وعملوا على تنفيذه حتى قتلوا خلقاً كثيراً في مصر والجزائر وسوريا وغيرها معتبرين قتلهم لمن يخالفهم قربة إلى الله، ومن ذلك أئمهم قتلوا في مدينة حلب في سوريا شيئاً كان مقتياً على قرية تابعة لحلب تسمى عفرى كان يخالفهم فدخلوا عليه في المسجد بعد صلاة العشاء بعدما انصرف الناس من المسجد وبقي هو ورجل آخر، ثم صوبوا إليه الرصاص فرمى ذلك الشخص نفسه على الشیخ فقتلوه ثم قتلوا الشیخ، وهذا الشیخ یسمی الشیخ محمد الشامی رحمه الله. وقد كان يحصل من حکام المسلمين قديماً وحديثاً الحکم بغير القراءان إما لرشوة وإما لقرابة أو لإرضاء ذوي النفوذ فلم يکفرُهُمُ المسلمين لحكمةِ بغير القراءان إنما اعتبروهم فاسقين.

## Fidnada Tafsiirka Sayyid Qutub

Intaa kadib dad badan ayaa ku fidnoobay tafsiirkii Sayid Qudub oo ku howlgalay fulintiisa oo dad aad u badan ku dilay dalka Masar iyo Jasaa'ir iyo Suuriya iyo qaar kale, ayaga oo u malaynaya dilka ay dadkaa dadka ayaga khilaafsan in ay Eebbe ugu dhawaanayaan, taas waxaa ka mid ah dadka ay ku laayeen magaalada Xalab ee Suuriya Sheekh mufti ka ahaa tuulo ka tirsan Xalab oo lagu magacaabo Cifriina oo kilaafsanaa warkooda kolkaas bay ugu galeen masjidka salaaddii cishaha ka dib kolkiid dadkiid ka kala tageen masjidka oo ay ku hareen asiga iyo nin kale, kadibna xabbed bay ku toogteen dabadeedna qofkiid la joogay ayaa sheekha isku aadiiyay kolkaas bay dileen kadibna sheekhii bay dileen, sheekhan waxaa lagu magacaabaa Sheekh Maxamad Ashaami Allaha u naxariistee. Madaxda muslimiintuna waayihii hore iyo haddaba way dhici jirtay in ay wax aan quraanka ahayn wax ku xukumaan ama laaluush dartiis ha ahaato ama qaraabo darted ha ahaato ama raalligelin ay dadka awoodda leh raalligelinayaan ha ahaatee muslimiintuna ma aysan kufrin taa ay quraanka wax aan ahayn wax ku xukumeen awgeed waxayse u qaateen in ay faasiqiin yihiin.

ثم إن هؤلاء أتباع سيد قطب يتفتنون في التعبير عن جماعتهم، قبل أربعين عاماً كانوا يُعرفون باسمين حزب الإخوان المسلمين في مصر وغيرها وفي لبنان باسم عباد الرحمن ثم استحدثوا اسماً ثالثاً عاماً وهو الجماعة الإسلامية ليُظنَّ الناس أنهم دعاة إلى حقيقة الإسلام اعتقاداً وعملاً، وواقع حالهم خلاف ذلك.

Intaa kadib, kuwaa Sayyid Qutub raacsan waxay kooxdooda ula baxeen magacyo badan, afartan sano ka hor waxaa loo yaqiin laba magac, Masar iyo meelo kale oo looga yaqiin Xisbiga Ikhwaanul Muslimiinka, iyo Lubnaan oo looga yaqiin magaca Cibaadur-Raxmaan, kadibna waxay la baxeen magac kale oo saddexaad oo guud ah kaas oo ah Jamaacada Islaamka si ay dadku ugu maleeyaan in ay yihiin kuwa ugu yeeraya dadka Islaamka xaqiqadiisa caqido ahaan iyo ku howlgal ahaanba, ayaga oo xaalkoodu sidaa ka duwanyahay.

أما حزب التحرير فِيمَا شَنُوا بِهِ عَنِ الْأَمَةِ قَوْلُهُمْ بِأَنَّ مِنْ يَمُوتُ دُونَ أَنْ يَبَايِعَ الْخَلِيفَةَ فِيهِنَّ مِيتَةً جَاهِلِيَّةً أَيْ عُبَادِ الْأَوْثَانِ، فَعَلَى قَوْلِهِمْ كُلُّ مُسْلِمٍ يَمُوتُ مِنْذَ أَكْثَرَ مِنْ مائَةِ سَنَةٍ مِيتَةً جَاهِلِيَّةً لِأَنَّهُ لَا يَوْجُدُ خَلِيفَةٌ مِنْذَ ذَلِكَ الزَّمِنِ، أَمَّا الْخَلَافَةُ الْعَامَةُ الَّتِي تَدِيرُ شَؤُونَ الْمُسْلِمِينَ كُلَّهُمْ فَقَدْ انْقَطَعَتْ مِنْذَ زَمَانِ طَوْبِيلٍ. فَالْمُسْلِمُونَ فِي تَرْكِ نَصْبِ الْخَلِيفَةِ الْيَوْمَ هُمْ عَذْرٌ، أَعْنَى الرَّعَايَا، الرَّعَايَا لَا يَسْتَطِعُونَ الْيَوْمَ نَصْبَ خَلِيفَةٍ فَمَا ذَنُبُهُمْ، وَقَدْ قَالَ اللَّهُ تَعَالَى: ﴿لَا يُكَلِّفُ اللَّهُ نَفْسًا إِلَّا وُسْعَهَا﴾ [البقرة:286].

### Xisbu at-Taxriir

Xisbu taxriirku waxyaabaha ay ummadda ku khilaafeen waxaa ka mid ah weedhooda ah: qofkii dhinta asiga oo aan ballan qaadin "baayicin" khaliifada dhimashadiisu waa mid jaahili ah, oo ay uga jeedaan waa sidi sanamya caabudka, kolka hadalkoodaas haddii la raaco, qof kasta oo muslim ah ee dhintay boqolkii sano iyo dheeraadkii la soo dhaafay dhimashadiisu waa jaahiliyo maxaa yeelay ma uusan jirin khaliifo waqtigaas ilaa manta, khilaafada guudna ee maamulaysa amuuraha muslimiinta oo dhan waxay joogsatay muddo dheer ka hor. Kolka muslimiintu kategidda ay ka tageen khaliifada doorashadiisa waxay u leeyihiin manta cudurdaar, ujeeddadu waa bulshada, bulshadu ma awooddo manta in ay doortaan khaliifo kolka dambigoodu muxuu yahay, Ilaaheyyna wuxuu yiri: ﴿Kuma Kallifo Eebbe naf wax aan awooddeeda ahayn﴾ [al-Baqarah:286].

وأعظمُ مِنْ هَذَا ضَلَالًا قَوْلُهُمُ الْعَبْدُ يَخْلُقُ أَفْعَالَهُ الْإِخْتِيَارِيَّةَ لَيْسَ الاضطرارِيَّةَ حَالَفُوهُ قَوْلُ اللَّهِ تَعَالَى: ﴿اللَّهُ خَالِقُ كُلِّ شَيْءٍ﴾ [الزمر:62]. لِأَنَّ الشَّيْءَ يَشْمُلُ الْجَسَمَ وَعَمَلَ الْجَسَمِ، وَقَوْلُهُ: ﴿هَلْ مِنْ خَالِقٍ غَيْرُ اللَّهِ﴾ [فاطر:3]، وَقَوْلُهُ: ﴿قُلْ إِنَّ صَلَاتِي وَرُحْسُكِي وَمَحْيَايِ وَمَمَاتِي لِلَّهِ رَبِّ الْعَالَمِينَ لَا شَرِيكَ لَهُ﴾ [الأعراف:162].

Waxaana taas ka sii lunsanaan badan oraahdooda: addoonku wuxuu abuuraya falalkiisa ikhtiyaadka uu u leeyahay abuurina maayo kuwa uu ku khasbanyahay, waxayna ku khilaafeen qowlkii Eebbe: ﴿Eebbe ayaa ah abuuraha wax kasta﴾ [zumar:62]. Maxaa wacay erayga "shay" wuxuu koobayaa wixii jismi ah iyo falka jismiga, iyo qowlkii Eebbe: ﴿Miyuu jiraabuure aan Eebbe ahayn﴾ [Faadir:3]. Iyo qowlkiisa: ﴿Waxaad dhahdaa salaaddayda iyo saddaqadayda iyo noloshayda iyo dhimashadaydaba Eebbe ayaa leh caalamiinta Eebbahoodi aan shirkada lahayn﴾ [al-Ancaam: 162].

الله جعل الصلاة والنُسُكَ وهمَا مِنْ أَفْعَالِ الْعَبْدِ الْاخْتِيَارِيَّةِ كَلَّا حَلْقًا لَهُ، لَا يُشَارِكُهُ أَحَدٌ فِي ذَلِكَ أَيْ هُوَ أَبْرَزُ ذَلِكَ مِنَ الْعَدْمِ إِلَى الْوُجُودِ. فَدَلَّتْ هَذِهِ الْآيَاتُ عَلَى أَنَّ كُلَّ مَا يَدْخُلُ فِي الْوُجُودِ مِنْ جَسْمٍ وَحْرَكَةٍ وَسُكُونٍ وَلُونٍ وَتَفْكِيرٍ وَأَلْمٍ وَلَذَّةٍ وَفَهْمٍ وَعَجْزٍ وَضَعْفٍ كُلَّ ذَلِكَ بِإِيمَانِ اللَّهِ تَعَالَى لَا غَيْرَ وَإِنَّمَا الْعِبَادُ يَفْعَلُونَ وَلَا يَخْلُقُونَ. وَهَذَا إِجْمَاعُ الْمُسْلِمِينَ الَّذِي كَانَ عَلَيْهِ الصَّدْرُ الْأَوَّلُ وَالْجَمِيعُ إِلَيْهِ يَوْمَنَا هَذَا عَلَى ذَلِكَ.

Eebbe ayaa ka dhigay salaadda iyo saddaqada oo ka mid ah falalka addoomuhu ay u madax bannaanyihiiin iyo nolosha iyo geerida oo aan ka mid ahayn falka addoonku uu u madax bannaanyahay dhammaan (Eebbe wuxuu ka dhigay) uunkiisa, cidi kulama shirkowdo waxaa ujeeddaduna waa in uu asigu usoo baxshay nolosha jiritaan la'aan. Kolka aayadahaas waxay tusayaan in dhammaan waxa jiritaanka soo gala ee jismi ah ama dhaqaaq ama nagaadi ama midab ama fikirid ama xanuun ama macaan ama fahmid ama caajisnimo ama liidashao dhammaantood waxaasi waxay ku ahaadeen uumidda Eebbe kor ahaayee cidkalena maaha, hase ahaatee addoomuhu way falayaan amana uumaan. Arrinkaasina muslimiinta oo dhan baa isku raacsan oo ay haysteen muslimiintii qarnigii koobaad iyo columada oo dhan laga soo gaaro maalintan aan joogno oo rumaysnaa sidaa.

وَمِنَ الْآيَاتِ الدَّالِلَةِ عَلَى أَنَّ الْعَبْدَ لَا يَخْلُقُ أَفْعَالَهُ مُطْلَقاً الْاخْتِيَارِيَّةَ وَغَيْرَهَا قَوْلُ اللَّهِ تَعَالَى: ﴿فَلَمْ تَقْتُلُوهُمْ وَلَكِنَّ اللَّهَ قَتَلَهُم﴾ [الأنفال:17]. معَ أَنَّ الْمُسْلِمِينَ قَاتَلُوا فَقَاتَلُوا، نَفَى اللَّهُ عَنْهُمْ أَنَّهُمْ قَاتَلُوا مِنْ حِيثُ الْحَقِيقَةِ لِأَنَّ هَذَا القتالُ الَّذِي قَاتَلَهُ الصَّحَابَةُ حَصَلَ لِكُلِّ قَاتَلَهُمْ هَذَا لَيْسَ هُمْ خَلْقَهُ بِلِ اللَّهِ خَلْقَهُ هُمْ فَعَلُوا مِنْ حِيثُ الْكَسْبُ وَالظَّاهِرُ وَاللَّهُ خَلَقَهُ أَيْ أَوْجَدَهُ مِنَ الْعَدْمِ إِلَى الْوُجُودِ ثُمَّ قَالَ اللَّهُ تَعَالَى عَلَى إِثْرِ هَذِهِ الْجُمْلَةِ: ﴿وَمَا رَمَيْتَ إِذْ رَمَيْتَ وَلَكِنَّ اللَّهَ رَمَى﴾ [الأنفال:17].

Waxaa ka mid ah aayadaha caddaynaya in aanan addoonku abuurayn falalkiisa guud ahaan ama ha ahaadeen kuwa uu u madax bannaanyahay ama kuwa kale e', Weedha Eebbe kor ahaayee: ﴿Ma aadan dilina ee Eebbe ayaa dilay﴾[al-Anfaal:17]. Inkasta oo muslimiintu ay dagaallameen oo ay dileen, Eebbe ayaase sheegay in aanay ayagu wax dilin dhab ahaantii maxaa wacay dilkan ay asaxaabtu (gaalada) dileen wuu dhacay, hase ahaatee, ayagu dilkoodaas ma aysan uumin, laakiin Eebbe ayaa uumay, ayagu way faleen oo way kasbadeen sida muuqata, Eebbe ayaana uumay ujeeddadu waa asiga ayaa aheeysiyyay la'aan oo jiritaanka u soo saaray kadibna Eebbe wuxuu yiri kor ahaayee, oraahdaa ka dib: ﴿Ma aadan tuurin kolkii aad tuurtay laakiin Eebbe ayaa tuuray﴾[al-Anfal:17].

نَفَى الرَّمَيِّ عَنْ رَسُولِ اللَّهِ مِنْ حِيثُ الْحَقِيقَةِ وَالْإِبْحَارِ وَهُوَ الإِبْرَازُ مِنَ الْعَدْمِ إِلَى الْوُجُودِ أَيْ مَا خَلَقْتَ أَنْتَ ذَلِكَ الرَّمَيِّ الَّذِي حَصَلَ مِنْكَ بِلِ اللَّهِ خَلَقَهُ أَيْ هُوَ أَوْجَدَ ذَلِكَ الرَّمَيِّ الَّذِي حَصَلَ مِنْكَ أَيْ اللَّهُ تَعَالَى نَفَى الرَّمَيِّ مِنْ وَجْهِ وَأَثْبَتَهُ مِنْ وَجْهِ نَفَى أَنْ يَكُونَ ذَلِكَ الرَّمَيُ مُخْلوقًا لِلرَّسُولِ وَأَثْبَتَهُ مِنْ حِيثُ إِنَّهُ كَسْبَهُ أَيْ هُوَ فَعَلَهُ مِنْ غَيْرِ أَنْ يَكُونَ خَلْقَهُ. فَمُخَالَفَةُ التَّحْرِيرِيَّةِ لِهَاتِيْنِ الْآيَتَيْنِ صَرِيْحَةٌ وَلِلآيَةِ الْأُخْرَى أَشَدُ تَصْرِيْحًا.

Wuxuu (Eebbe) caddeeyay in aan Nabiga Alle tuurin dhab ahaantii iyo abuuris ahaan oo ah soo bixinta la'aantood jiritaanka loo soo bixinayo, ujeedaduna waa in aadan adigu uumin

(Nabiyow) tuuriddaas adiga kaa ahaatay laakiin Eebbe ayaa abuuray ujeeddadu waa in uu asigu ahaysiyyay tuuriddaas aad adigu samaysay, kolka Eebbe waynaayee, tuuridda dhinacna wuu ka diiday dhinacna wuu ka sugay, wuxuu diiday in tuuriddaasi ay ahaato mid Nabigu uumay, wuxuuna sugay in ay tahay kasbashadiisi, taas oo ah in uu falay asiga oo aan uumin. Kolka Xisbiga Taxriirku in ay labadaa aayadoo khilaafeen way caddahay, aayadda kalena waaba ka sii daranyahay (khilaafkoodu).

قالَ الْإِمَامُ أَبُو حَنِيفَةَ: "أَعْمَالُ الْعِبَادِ فَعْلٌ مِّنْهُمْ وَخَلْقٌ لِّهِ" وَعَلَى هَذَا سَلْفُ الْأُمَّةِ وَخَلْفُهُمْ وَمَا خَالَفَ هَذَا فَهُوَ خَالِفٌ كِتَابِ اللَّهِ وَخَالِفٌ حَدِيثِ رَسُولِ اللَّهِ، فَقَدْ رَوَى الْبَخَارِيُّ وَغَيْرُهُ أَنَّ الرَّسُولَ عَلَيْهِ السَّلَامُ كَانَ يَقُولُ إِذَا قَفَلَ مِنْ حَجَّ أَوْ عُمْرَةَ أَوْ غَزْوَةً "لَا إِلَهَ إِلَّا اللَّهُ وَحْدَهُ لَا شَرِيكَ لَهُ نَصْرٌ عَبْدُهُ وَأَعْزَزُ جَنْدُهُ وَهُزْمُ الْأَحْزَابِ وَحْدَهُ" ، جَعَلَ رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ هُزْمَ الْأَحْزَابِ خَلْقًا لِّهِ تَعَالَى وَحْدَهُ لَمْ يَشَارِكْهُ فِيهِ غَيْرُهُ مَعَ أَهْمَمِهِمْ فِي الظَّاهِرِ حَصَلَ مِنْهُمْ هُزْمُ الْعُدُوِّ وَهَذَا أَبْيَانُ الْبَيَانِ . وَهُنَاكَ ءَايَاتٌ أُخْرَى تَدْلِيلٌ عَلَى أَنَّ الْعِبَادَ لَا يَخْلُقُونَ أَعْمَالَهُمْ مُطْلَقاً كَقَوْلِهِ: ﴿وَاصْبِرْ وَمَا صَبْرُكَ إِلَّا بِاللَّهِ﴾ [النَّحْل: 127]. وَقَوْلُهُ: ﴿وَمَا تَوْفِيقِي إِلَّا بِاللَّهِ﴾ [هُود: 88].

Wuxuu yiri Imaam Abuu Xaniifa: "Falka addoomuhu waa Waxqabadka ay sameeyeen, wuxuuna uun u yahay Eebbe" culumadii horena sidaa ayay aaminsanaayeeyen iyo waliba kuwa dambe, wixii taa ka duwanna waa wax ka baxsan kitaabka Eebbe kana baxsan xadiiska Nabiga Eebbe, Maxaa wacay waxaa soo weriyay Bukhaari iyo qaar kale In Nabigu nabadjelyo korkiisa ha ahaatee uu dhihi jiray haddii uu ka soo laabto xajka ama cumrada ama duullaanka: "Ilaahay Ilaah aan ahayn ma jiro oo kali ah aan shirko lahayn, addoonkiisa wuu u gargaaray, ciidankiisana wuu xoojiyyat waxsaabtana wuu jebiyay kaligiis" kolka wuxuu ka dhigay Nabiga Eebbe nabadjelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, jebinta xisbiyada uun Eebbe leeyahay kaligiis kor ahaayee oo aanan cid kale oo aan asiga ahayn kula shirkoobin, inkasta oo muuqaalka kore uu ayaga (Nabiga iyo Asaxaabta) ka dhacay falka ah jebinta cadawga, kaan ayaana ah kan ugu muuqda caddaymaha. Waxaa kale oo jira aayado kale oo tusayda in addoomuhu aanay uumayn falalkooda marnaba sida oraahda Eebbe: ﴿oo dulqaado dulqaadkaaguna Eebbe uun buu ku ahaan﴾ [al-Naxal:127] iyo Oraahdiisa: ﴿Towfiiqdayduna Eebbe uun bay ku ahaan﴾ [Huud:88].

هذا إذا كانَ الْخَلْقُ بِمَعْنَى الإِبْرَازِ مِنَ الْعَدْمِ إِلَى الْوُجُودِ أَمَا الْخَلْقُ إِذَا أَرِيدَ بِهِ تَصْوِيرُ صُورَةٍ أَوْ افْتَرَاءُ الْكَذْبِ أَوْ التَّقْدِيرُ فَيَصِحُّ أَنْ يُضَافَ إِلَى الْعِبَادِ وَقَدْ قَالَ اللَّهُ تَعَالَى فِي حَقِّ عِيسَى: ﴿وَإِذْ خَلَقْتُ مِنَ الطِّينِ كَهْيَةً الطَّيرِ﴾ [المائدة: 110]. إِنَّ مَعْنَى تَخْلُقُ هَذَا تَعْمِلُ صُورَةً لِمَنْ عَنَاهُ تُبَرِّزُ الطَّيْرَ مِنَ الْعَدْمِ إِلَى الْوُجُودِ . وَكَذَلِكَ قَوْلُهُ تَعَالَى: ﴿فَتَبَارَكَ اللَّهُ أَحْسَنُ الْخَالِقِينَ﴾ [الْمُؤْمِنُونَ: 14].

Kaasi waa haddiin uu yahay uunku soo bixin jiritaan la'aan wax ku ujeeddo ah oo loosoo bixinayo jiritaanka, laakiin abuurista haddii looga jeedo masawir sawiriddiis ama been sheegiddeed ama qaderidda waxaa dhici karta in addoomaha loo saarsho wuxuuna Eebbe yiri kor ahaayee asiga oo (Nabi) Ciisa ka hadlaya: ﴿Iyo goortii aad ka uumaysay dhoobada qaabka shimbireed﴾ [al-Maa'idah]. Kolka ujeeddada waad uumaysay halkan waa waxaad samaynaysay masawir ee maaha in uu ka soo bixinayay shimbirka jiritaan la'aan una soo bixinayay jiritaanka. Wuxuu kaa la mid ah weedhii Eebbe kor ahaayee: ﴿kolka waxaa nasahnaaday Eebbe kan ugu wanaagsan kuwa wax uuma﴾ [al-Mu'miniin:14].

معنى الخلق في هذه الآية التقدير ليسَ الخلق بمعنى الإبرازِ من العدم إلى الوجود إنما معنى الآية الله أحسنُ المُقدّرين وقالَ تعالى: ﴿وَخَلَقُوكُنْ إِفْكًا﴾ [العنكبوت:18]. تسبَّبَ إلى المشركيَنَ خلْقَ الإِلْفَكِ أي افتراءُه ليس معناه أنهم يخلُّقونَ الإِلْفَكَ بمعنى الإبرازِ من العدم إلى الوجود. وورُودُ الخلقِ بمعنى التقديرِ معروفةٌ عند العربِ القدماءِ قالَ بعضُ الشعراءَ:

ضُّرُّ الْقَوْمِ يَخْلُقُ ثُمَّ لَا يَفْرِي  
وَلَأَنْتَ تَفْرِي مَا خَلَقْتَ وَبَعْدَ

أَيْ يَقُولُ الشَّاعُورُ لِمَدْوِحِهِ أَنْتَ تُقْدِرُ ثُمَّ تُنْفَدُ وَبَعْضُهُ غَيْرُكَ يَقْدِرُ ثُمَّ لَا يُنْفَدُ.

Ujeeddada uumitaanka ee aayaddan ku soo aroortay waa qaddeerida mana aha uumista ujeedadeedu tahay ka soo bixinta jiritaan la'aan ee jiritaanka loo soo saarayo, ee ujeeddada aayadda waa Eebbe ayaa ugu wanaagsan kuwa wax qadera, waxaa kale ee Eebbe yiri: ﴿Waxaad uumaysaan been﴾[al-Cankabuut:18]. Wuxuu u saarshay mushrikiinta abuuritaanka beenta taas oo ah sheegiddeeda ujeeddaduna maaha in ay ayagu uumayaan beenta oo ah in ay ka soo bixinayaan jiritaan la'aan una soo bixinayaan jiritaanka. Ku imashaada ay uumistu ku timid ujeeddada qaddeerida waa arrin ay carabtii hore taqiiin, waxay dhaheen gabyaaga qaar ka mid ah:

Adiga ayaa fulsha waxaad uuntay ----- raga qaarna wuu uumaa mana fulshaan.

Wuxuu ku leeyahay gabyaagu qofkii uu ammaanayay: adigu waad qaddeeraysaa kadibna waad fulinaysaa, qaar kalena way qaddeerayaan fulinna maayaan.

فِمِنْ بَابِ إِنْكَارِ الْمُنْكَرِ الَّذِي فَرَضَهُ اللَّهُ عَلَى الْمُسْلِمِينَ يَجِبُ إِنْكَارُ عَلَى هُؤُلَاءِ وَتَحْذِيرُ النَّاسِ مِنْهُمْ وَمِنْ كُلِّ فِرْقَةٍ حَالَفَتْ مَا دَرَجَ عَلَيْهِ الْمُسْلِمُونَ مِنْ أَيَّامِ الصَّحَابَةِ إِلَى هَذَا الْعَصْرِ وَهُمْ جَمِيعُ الْأُمَّةِ، وَهُؤُلَاءِ الشَّاذُونَ شَرَادُمْ قَلِيلَةٌ بِاعتِبَارِ كثْرَةِ أَهْلِ السَّنَةِ، وَقَدْ أَوْصَى رَسُولُ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ بِلُزُومِ الْجَمَاعَةِ وَقَدْ صَحَّ عَنْ رَسُولِ اللَّهِ صَلَّى اللَّهُ عَلَيْهِ وَسَلَّمَ أَنَّهُ قَالَ: "عَلَيْكُمْ بِالْجَمَاعَةِ وَإِيَّاكمْ وَالْفُرْقَةِ إِنَّ الشَّيْطَانَ مَعَ الْوَاحِدِ وَهُوَ مِنَ الظَّنِينِ أَبْعَدُ، فَمَنْ أَرَادَ بُحْبُوْحَةَ الْجَنَّةِ فَلِيَلْزِمْ الْجَمَاعَةَ". رَوَاهُ التَّرمِذِيُّ فِي جَامِعِهِ وَقَالَ حَدِيثٌ حَسْنٌ صَحِيحٌ وَابْنُ حَبَّانَ وَابْنَ مَاجَةَ وَغَيْرَهُمْ.

Kolka waajibka uu Eebbe saaray muslimiinta ee ah in xumaanta la diido waxaa ka mid ah in kuwaa (xisbiga taxriirka ah) la diido oo dadkana looga digo iyo koox kasta oo khilaafta wixii ay muslimiintu ku socdeen laga soo billaabo casrigii asaxaabta ilaa laga soo gaaro casrigan kuwaas oo ah jumhuurka ummadda, kuwaa fallaagada ahna waa koox yar kolka loo eego tirade badan ee ahlusunnada, wuuna ka dardaarmay Nabigii Eebbe nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee in la lajiro jamaacada waxaana sax ah oo laga soo weriyay Nabiga nabadgelyo iyo naxariisi korkiisa ha ahaatee, in uu yiri: "waxaan idinku ogahay jamaacada waxaanna idinkaga digayaa kala tegidda maxaa yeelay shaydaanku wuxuu la jiraa kalida labadana wuu ka fogyahay, kolka qofkii doona raaxada jannada ha qabsado jamaacada" waxaa soo weriyay Tirmizi kitaabkiisa jaamica ah wuxuuna yiri waa xadiis wanaagsan oo sax ah (waxaa kale oo soo weriyay) Ibn Xibbaan iyo ibn Maajah iyo qaar kale.

ثم نصيحتنا لهؤلاء الفرق الثلاثة أن يتعلّموا علم الدين من أفراد أهل السنّة ليس من مؤلفاتِ محمدٍ بن عبدِ الوهاب ولا من مؤلفاتِ سيد قطب ولا من مؤلفاتِ تقىي الدين النبهاني بل أن يقرؤوا على أهل العلم كتبَ العلماء المعتبرة ككتابِ البخاري المسمى "خلقُ أفعالِ العبادِ" وكتابِ أبي جعفر الطحاوي المسمى بالعقيدة الطحاوية وكتابِ "تفسير الأسماءِ والصفاتِ" للإمامِ أبي منصور عبدِ القاهر بنِ طاهر البغدادي. فإن تخلّيت عن عقائدكم وأخذتم بهذه العقائد اهتديتم وإلى الله ترجع الأمورُ وإليه المئلُ والتشور. والله سبحانه وتعالى أعلم.

Intaa kadib waxaan ku waaninaynaa kooxahaa saddexda ah in ay bartaan cilmiga diinka oo ka qaataan ahlusunnada aanayna ka qaadan kutubtii Maxamad Bin Cabdulwahhaab oo aanay ka qaadan kutubtii sayyid Qudub oo aanay ka qaadan kutubtii Taqiyuddin an-Nabaanaani, taa daaye, waa in ay ka bartaan culumada kutubta culumada la aqoonsanyahay sida kitaabka Bukhaari ee lagu magacaabo "Khalqu Afcaalil Cibaad" iyo Kitaabka Abii Jacfar ad-Daxaawi ee lagu magacaabo Caqiidada daxaawiyada iyo kitaabka "Tafsiirka Magacyada iyo Sifooyinka" ee uu leeyahay Imaam Abuu Mansuur Cabdul Qaahir al-Baqdaadi. Kolka haddii aad ka hartaan caqidooyinkiinna oo aad caqiidadaa qaadataan waad hanuunaysaan Eebbe xaggiis ayaadna umuuruhu u noqdaan xaggiisa ayaanaa loo ilanayaan oo ururayaan. Eebbe nasahnaayee oo kor ahaayee ayaanaa ogaal badan.